Waxbarashada warbaahinta iyo joornaaliiska

Ma doonaysaa in aad heshid aasaas shaqo oo fiican, islamarkaana ah caalami, ahna mid horumar wanaagsan ku talaabsaneysa marba-marka ka danbeysa?
Ma doonaysaa in aad waxbarashadaada aad siiwadatid kadib marka aad dhameysid waxbarashada dugsiga sare?
Ma doonaysaa in aad xayeysiisyada iyo wararka in aad baadhitaan cilmiyeesan ku sameysid?
Ma doonaysaa inta aad ku jirtid waxbarashada dugsiga sare in aad shaqeysid?
Ma doonaysaa in aad shaqeysid ama aad wax kabaratid dibada mustaqbalka?
Sidaas daraadeed waxbarashadan warbaahinta iyo joornalisamku waa mid adiga kugu haboon.

Waxbarashadan joornalisamka iyo warbaahinta waxa aad baran doontaa sidii aad wararka aad u tabinlaheyd.waxa kale oo aad tijaabooyinbadan aad ku sameen doontaa sidii aad uturjumilaheyd, kuna sameen laheyd baadhitaano cilmiyeesan xayeeysiiyada.
Waxbarashadan warbaahinta iyo joornaalisku waxay wax barashadu iskugu jiridoontaa mid ah casharo iyo tababaro.waxaad isku dey doontaa waxyaalo badan , wax qabad yadaadana waad u madax banaanaan doontaa.

Dadbadan ayaa aad u xiiseeynaya in ay ka shaqeeyaan shaqooyinka warbaahinta.sidaas darteed waxaa laga yaabaa in ay kugu adkaato sidii aad shaqo toos ah aad ku heli laheyd kadib marka aad dugsiga sare aad dhameysid.laakiin wakhtiga yaa kuu ogolaandoona sida aad ku kala ogaandoontid shaqooyinka aad doonaysid in aad ka shaqeysid.Haddii aad doontidna waxbarashadaada ayaad siiwadan doontaa.

In aad shaqeysid ama waxbarashadaada wadatid.

Waxaa jira shaqooyin aad raadsankareysid kadib marka aad waxbarashada warbaahinta ee dugsigasare aad dhameysid.waxaa kamid ah tusaale ahaan sida,madbacadaha waxlagudaabaco,waxaa intabadan muhiim ah in aad waxbarashadaada aad siiwadatid, si fursadahaaga ah in aad kashaqeysid warbaahinta ey aad u sii xoogeysato.
Waxaa jira waxbarashooyin aad u badan oo ah warbaahinta.waxaana aad ka dhigankartaa dugsiyada farsamada ama dugsiga umada(folkhögskola)ama jaamacadaha.waxaa jira wax barashooyin teknika ah oo takhasus ah.

Waxaa dhicikarta inaad waxbarashadaada dugsiga sare aad dhameystir ku sameeysid. waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada (studie och yrkesvägledare).

Shaqooyinka aad helikareysid.

Tusaale ahaan shaqooyinka warbaahinta waxaa ka mid ah sida, joornaaliiska, warbaahinta,sawirqaadida,qaab farshaxameedka sawirida,daabacaada,hagaajinta iyo habeenta sida filimada,sawiritaanka gacmaha, war- tabiye,filimsameeye,filim soosaare.
Waxaana jira habab farabadan oo lagu baahiyo wararka, waxaana kamid ah sida joornaalada,tiifiiyada,radiyowga iyo internetka.shaqooyinka inta badani waxa ay kaaga baahan yihiin in aad waxbarashadaada aad sii wadatid.

Waxbarashadu waxa ay ka koobantay

Waxbarashadan warbaahintu waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada warbaahinta oo kaliya. Waxaa intaa sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gaar u doorankartid.

Waxbarashadani waxa ay leedahay 2 takhasusood oo kaladuwan.taas oo macnaheedu uu yahay ardayda dhamaan dhigata waxbarashadan warbaahinta ee kuna sugan dalkan iyo nawaaxigiisa waxa ay doorankaraan marba kii ay rabaan in ay ku takhasusaan.Waxaa laga yaabaa meelo qaarkood in ay jiraan takhasusooyin farabadan oo kala duwan. Kuwaas oo laga yaabo in ay adiga gaar ahaan kugu haboonyihiin. Waxaad weydiinkareysaa, kalana tashankartaa qofka uqaabilsan waxbarashada dugsiyada(studie och yrkesvägledare)

Takhasuska guud waxa uu ka mid ah.

- Soosaarida wararka- Waxa aytahay shaqadani mid aad baran doontid habka teknikada ama farsamada ee warbaahinta, tusaale ahaan sida loo diyaariyo carwooyinka,bandhigyada, sawirida warbaahinta,raadiyowyada,iyo wixii kale ee la xidhiidha maqalka iyo muuqaalada,sawirqaadida,filimada, tiifiiyada,iyo qoraalada warbaahinta.
- Farsamada madbacada- waxa ay gaar utahay adiga haddii aad xiiseyneysid in aad baratid daabacada madbacadaha, adigoo adeegsanaya qalabyo loogutalagalay sawiraada.

Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashada warbaahinta iyo joornaaliisamka waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,Waxaad kaloo aad heysataa ugu yaraan ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Tababarkaana waxaa kuu diri doona iskuulkaaga isaga oo markaas ay wada shaqayn ay kadhaxeyso iskuulkaaga iyo goobaha shaqo ee u dhaw meesha aad degen tahay.meesha aad tababarka aad

kasameendoontid waxa ay ku xidhantahay hadba takhasuskaagu waxa uu yahay.Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid.xidhiidh kaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.haddii aad doonaysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, way surtogal noqon kartaa.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaa lagayaabaa in ay kugu adkaato in aad shaqo heshid mustaqbalka, xataa haddii aad waxbarashadaad aad sii wadatid kadib marka aad waxbarashada dugsiga sare ka baxdid. Dadbadan ayaa shaqooyinka aad uraadiya unajecel in ay helaan, dadbadana shaqo la aan ayaa heysata, oo wayshaqo la yihiin.